JamhuuriyaddaFederaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Xafiiska Guddoonka

Warbixinta Golaha Shacabka Ku Saabsan Kalfadhiga 1-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA.

20ka Agoosto ilaa 30ka Diseembar 2012

Tusmo:

QEYBTA 1AAD: HADALJEEDINTA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA OO KU AADDAN MUNAASABADDA XIRITAANKA KALFADHIGA 1AAD 3

QEYBTA 2AAD: SOO-KOOBID WARBIXINTA HAWLAHA GOLAHA GUUD AHAAN 12

QEYBTA 3AAD: HAWLAHA HIRGALAY KALFADHIGA 1-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA 21-ka AGOOSTO – 30-ka DISEEMBAR 2012 13

QEYBTA 4AAD: WUFUUDDA HEER CAALAMI EE SOO BOOQDAY BAARLAMAANKA..... 14

QEYBTA 5AAD: WUFUUDDA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKU QAABILAY KALFADHIGA 1AAD..... 14

QEYBTA 1AAD: HADALJEEDINTA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA OO KU AADDAN MUNAASABADDA XIRITAANKA KALFADHIGA 1AAD

1. Arar

Maaanta waa maalin taariikhi ah. Waxaan u fadhinaa inaan gabagabayno sannadki koowaad ee Golahani Jirey. Sidaas awgeed waa in aan isweydiinno wixii inno qabsoomay kana fekerro sidi aan mustaqbalaka uga gudbi lahayn caqabadaha inna horyaal. Warbixintani waxay iftiiminaysaa waxayaabaha innoo qabsoomaya iyo siyaabaha ay tahay in aan u sii hagaajinno waxa qabadkeenna. Waxaynu u baahannahay inaan ka fekerro sidi dadkeennu nolool fiican ku hanan lahaa.

Eebbe mahadi ha ka gaartee, sannadki koowaad waxaan gaba-gabaynnay innaga oo midaysan oo u heellan inaan ka gudubno caqabadaha inna horyaal.

Manta oo ay aynnu xusayno dhammaadki sannadki koowaad ee xilliga xilkeenna, waa in aan aan mar walba maanka raggii, dumarkii iyo carruurti ku nafwaayay dagaalka aaya beelka ah ee dalkeenni halakeeyay. Tira sugan lama hayo, waxayse xoga badani ku qiyaasaan in ay malyan qof kor u dhaafsanyihiin. Dadkaas intaas le'egi waxay innaka mudanyihiin inaan in ay innaka go'onaato in aan ku mintidno sidi ay dalkeenna nabadi uga hanaqaadi lahayd. Waxay innaka mudanyihiin, in aan ka dhabayno inaan waxa laystaan ahi mar dambe dib dhexdeenna uga dhicin. ***MAR DAMBE MAYA, MAR DAMBE MAYA COLAAD***.

Manta oo aynu xusaynno dhammaadki sannadki koowaad, waa in aan maanka ku haynno boqollaalka kun oo dantu ku kalliftay inay ka barakacay degaannadoodi kuna khasbanaaday inay degaanno kale nafta kula caraaraan. Waxay innka mudanyihiin, inaan u hagarbaxno sidi nolol xasilloon iyo qiira waddanimo uga hanaqaadi lahayd dadkeenna.

Kumanaanka kun ee lumiyay hantidoodi iyo ilihi tabcashada wixi ay ku nolaayeen, waxay innaka mudanyihiin inaan ku mintidno ku dhaqanka sharciga iyo in is-xukun waxa ku ool ahi uu beddelo talinta qoriga. Wakhti iyo dadaal badan waa in loo huro in aan hananno:

- Nabadayn hanaqaadda;
- Barakacayaasha oo degaannadoodi dib ugu noqda;
- Hantida`ma guurtada ah oo xaqlaha ay ka maqantahay loo celiyo
- Midnimo qaran oo tiirar la hubo taagan

Waxaa xasuus damqasho badan igu reebay, dilki loo geystay labadi xildhibaan ee innaka mid ahaa, ayaga oo xilkoodi gudanaya. Waxay innaka mudanyihiin in ayannaan gabin xilkii ay u foojignaayeen oo hadda innaga qoorta inno suran. Ma guul-darraysan karno. ***ALLANA GUUSHA HA INNALA QABTO.***

Da'ayarta dalkeenna, oo aaan indhaha saarin waxa dawladi tahay iyo waxa ay ku saabsntahay, waxaan ballan ugu qaadaynaa inaan u horseedno dawladnimo ay ku diirsadaan. Waxaad tihiin madaxdayadi mustaqbalka, waxanna idiin ballanqaadeynaa in aan dhidibbada u aasno mutaqbal aan ku faanidoontaan.

Manta waxaan idin soo hordhigayo warbixin sannadeedki wax-qabadki baarlammaanka. Warbixintu waxay soo bandhigaysaa meeshi aan xilka ka soo ambaqaadnay, mintidnimadi aan ku soo gaarnay meesha aan hadda joogno iyo caqabada inna horyaal. Waxaa kaloo la innoka baahanyahay inaan isla meel-dhigno qorshayaasha xil-gadasho ee inna sugaya kal-fadhiga soo socda.

2. Gogol-dhig

Bartilmaameedyada taariikhiga ah ee la gaaray tan iyo marki laga baxay xillgii ku-meel-gaarka ahaa, waxaa ugu muhimsan:

- Dastuurka Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya waxaa 1dii Agoosto 2012 meelamariyay Golihi Dastuuriga ahaa.
- Xildhibaanno ahaan waxaa inna soo xulay guurtida Soomaaliyaeed waxaana xilka la inno dhaariyay 20kii Agoosto 2012 muddo affar sano ah (4), innaga oo beddellay Baarlamaanki Federaalka e ku Meel-gaarka ahaa.
- Golaha Shacabka ee aan xubnaha ka nahay waa kii rasmiga ahaa ee ay Soomaaliya mudda labaatan sano ah yeelato
- 28kii Agoosto ee isla sannadkaas waxaa la doortay shir-guddonka baarlamaanka oo ka kooban afhayeen iyo laba ku-xigeen;
- 10kii Sebtember waxaa la doortay Madaxweynaha jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- 6dii Oktoobar waxaa madaxweynuhu magacaabay Ra'iisul Wasaarihi Xukuumadda
- Waxaa kalsooni buuxda la siiyay Golaha Xukkuumadda

Tallaabooyinkaas oo dhan wuxuu baarlammaanku ku guulaystay asaga oo mid ah.

3. CAQABADA INNA HORYAAL

Waxaan ka gudubnay caqabado adag, kwa kalena waa inna horyaallaan:

- Dalka iyo shacabka Soomaaliya waxaa la soo gudboonaadey colaado arxan-goys ah oo naafeeyay dad iyo agabba. Dhidibba u aasidda Goleheennu waa inay noqoto bilawgi ka sabatabixidda leelleeka;
- Xilka ugu weyn ee baarlamaanka horyaal waa in la helo ku dhaqanka sharciga, taasoo laga maarmaan u ah hirgelinta dastuurka;
- Soomaaliya weli waxaa ka jira colaado, sidaas awgeed nabadaynta iyo midaynta dadkeennu waa xilka ugu weyn oo inna horyaal;
- Soomaaliya waa inay ku tallaabsato tubta horumarinta iyo dib-u-dhiska taasoo u baahan soo celinta isku-kalsoonida shacabka si dadka dhulka ku sugan iyo qurbajoogtuba ugu dhiirradaan inay dalka maalgashadaan.

Goalahan waxaan looga baahanyahay inay dejiyaan sharciyadi lagama maarmaanka u ah maalgashiga;

- Soomaaliya waa inay dib-u-hanataa kaalinta ay ku lahayd beesdha caalamka, gaar ahaan dalalka deriska ah, si ay ay mutaysato inay hesho fursadaha maalgelin ee adduunka iyo dalka gudihiisa laga dhalin karo. Golahan wuxuu xil ka saaranyahay sidi loo soo celin lahaa hay'baddi qaranka.
- Golahan wuxuu xil-gudshadiisa ku bilaabay, agab ahaan, meel maran. Agabki hawlgalka ka sookow, waxaa lagama maarmaan ah inuu goluhu yeesho hay'kal shaqo oo wax ku ool ah, karti dad iyo kaabayaasha laga maarmaanka u ah xil-gudushadiisa.

Allow me then by Brothers and Sister to remind you of what is said in Surah **94**

Alamnashraq

Did We not expand for you, [O Muhammad], your breast?

And We removed from you your burden

Which had weighed upon your back

And raised high for you your repute.

For indeed, with hardship [will be] ease.

Indeed, with hardship [will be] ease.

So when you have finished [your duties], then stand up [for worship].

And to your Lord direct [your] longing

Sida dhabta ah, daal ka dib ayaa nasniino la gaaraa. Dadaalkeenna waa in aynnaan dhimi ee dar-dar hor leh sii gelinnaa.

4. MAXAAN QABANNAY

Xaaladda aan hadda ku sugannahay, waxaynu weli taagannahay bilawgi dhidibba u aasidda xukumad cusub oo laga sugayo inay dalkeenna gaarsiiso dimuqaraaddiyad. Hay'adihi xukuumaddu weli hanqaad ma noqon. Saddexdi bilood ee Goluhu jiray wuuxuu yeeshay **46 Fadhi caadi** iyo **9 Fadhi aan caadi ahayn** waxaana qabsoomay:

1. Doorashadi shir-guddoonka Golaha;
2. Doorashadi madaxweynaha;
3. Saddex kulan oo lala yeeshay guurtidi inna soo xushay;
4. Kalsooni siinti Ra'isul Wasaaraha;
5. Kalsooni siinti golaha xukuumadda iyo barnaamijka xukuumadda;
6. Meel-marinta Xeer-Hoosaadka Golaha;
7. Doorashada Guddiyadi Golaha;

8. Meel-marinti istrateejida xil-gudashada Golaha ka dib marki laba maalmood oo lafagurid ah la iskula mee-dhigay;
9. ka doodidda iyo meel-marinta Miisaaniyadda Xukuumadda ee sannadka 2013;
10. Qaabilaaddi Wasiirka arrimaha dibadda ee dalka Turkiya;
11. Qaabbilaaddi Qarammada Midoobay;
12. Qaabiladdi afhayeenka Baarlamaanka Dalka Jabbuuti;

Ku tala galka golohu waxa weeye inuu si dhab ah u hawlgalo kal-fadhiga soo socda ee bilaaban doona bisha Maarso ee sannadka 2013.

Xafiiska Afhayeenka baarlammaanku si buuxda ayuu u hawlagalay. Hawlaha ugu muhimsan ee aan hortiinna ka sheegayo waxaa ka mid ah:

1. Marar kala geddisan ayaan noqoday Ku-simaha-Madaxweynaha;
2. Waxay afhayeenka iyo ku-xigeennadiisu qaabilleen wufuud ajnebi ah
3. Waxaan qaabbillay madax iyo hay'ado deeq-biixyayaal ah;
4. Waxaan Guurtida Soomaliya la yeelannay saddex kulan;
5. Waxaan xarunta baarlammaanka kula kullannay guddi ardada jaamacadaha ka mid ah;
6. Kulammo badan oo jadwal lahayn oo aan la yeelanno xildhibaannada

5. Waa maxay Istrateejiyadeenno?

Istrateejiyadeennu waxa weeye in laga dhabeeyo himilada ummaddeenna taas oo aan ku mutaysan karno in aan noqonno afhayeenka shacabka Soomaaliya. Golahani wuxuu matilaa shacabka Soomaaliya oo dhan, sidaas awgeed waa inuu gutaa xilkisa dastuuriga ah kaas oo ah inuu dejiyo sharciyada dalka iyo dadka lagu dhaqayo, korjooteeyo xukuumadda si uu ugu sandulleeyno in ay ka ka mira dhaliso xilki masu'uuliyaddi ay xambaarsatay, taas oo ah in ay inta tabarteeda ah horseeddo:

- Nabad;
- Midnimo, iyo
- Horumar.

Si xilkaas goluhu u guto, waa in ay hagaan mabaadi'ida soo socta:

Ammaano – qof kasta oo xubin ka ah Aqalka Daweynaha waxa luqunta ku surtay ammana ah in marka la gaaro bartamaha 2016 uu golahan beddelidoono Gole ay dadku si toos u soo doortaan.

Hufnaan – xubin kasta oo ka mid ah golahan wuxuu ballanqaaday in uu ku dhaqmo nafti-hurennimo, hufnaan tan ugu sarraysa, daacadnimo ay u sii dheertay in ay adeegsado xirfad hoggaamineed.

U nuglaanshaha dareenka shaxcabka: xubna ahaan waxaan ballanqaadnaaday in aan u nuglaano ogaanshaha dareenka dadweynaha wax kasta oo kalena kaq

hormarinno si loo isla dareenkaas looga dhaliyo indisayaal horumar. Gole ahaan waa in aan mar kasta u heellanaana in shacabku innakula xisaabta hadba waxa aynu ka qabannayt xilki ay innoo igmadeen.

Qaddarin – Gole ahaan waxan ballanqadnay in aan si isku mid ah u xurmaynno guurtideenna, cid kasta oo kaalin xaq ah ku lahayd in aan xilka qoorta la innoo suro iyada oo aynnaan u kala xigsnayn gobol, qabiil iyo isir midna

Waddaniyad: waxaan ballan qaadnay in aan dadka ugu adeegno si waddanibimo ah.

Intrateejoyada Golaha waxa weeye in laga dhabeeyo saddex bartilmaameed oo ma huraan ah:

- Goluhu waxa uu samayn doonaa sharciyo wax ku ool ah, qaybaha dawladda oo kalena waa uu korjoogtayndoonaa;
- Xubin kasta oo goleheenna ka mid ah waxaynu u hori donna awood uu ugu qalmo in uu matilo degaanka uu matilo, isla markana waxaynu ballanqaadnay (kuna xisaabtamidoonnaa) gole ahaan in dadka aynu matilaynaa innala xisaabtamaan, si loo gaaro midnimo qaran iyo nabad;
- Waxaa goluhu yeelanayaa maamul hufan iyo kaabayaashi hawlfulinta ee lagama maarmaanka u ahaa xil-gudashadiisa.

6. Bartilmaameedyada Istrateejiyada Golaha

Istrateejiyada aan degsannay waxay inna faraysaa in aan ka mira dhalinno lix iyo toban (16) bartilmaameed oo mudnaan leh, kuwaaso kala ah:

1. Xeer-Hoosaad wax ku ool ah

Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka, ee aan meelmarinnay, wuxuu xildhibaannada u suurta gelainayaa in ay si habsami leh u gutaan xilalkooda kala ah:

- wakiilnimada dadweynaha
- sharci dejin, iyo
- kor-joogtaynta hay'adaha kale ee dawladda.

2. Guddiyo Fir-Fircoon oo Hawlkar ah

Guddiyadi kala gedisnaa ee uu inna farayeen dastuurka iyo xeer-hoosaadka goluhu waa inno dhisanyihiin. Muhimadda guddiyadu waxa weeye inay noqdaan marinki uu goluhu ku gudan lahaa xilalkiisa kala ah:

- Dejinta sharciyada dalka lugu hagi lahaa
- Joogtaynta Korjoogtaynta hay'adaha kale ee dawladda, iyo
- Ka qayb-qaadashada horseedidda`nabadda iyo midnimada qaranka

3. Kor-joogtaynta Hay'adaha kale ee Dawladda

Kor-joogtayntu waa xilka ugu muhimasan ee Goalaha saaran. Muddadi yarayd ee goluhu jiray, xildhibaannadu waxay muujiyeen in aanay ka gabbanayn in ay la xisaabtamaan hay'adaha kale ee dawladda.

4. Dhaqan-gelinta miisaaniyadda iyo kormeeriddeda ku dhaqmiddeeda

Waxa keliya oo aan qabannay ilaa hadda waa in goluhu ansixiyay misaaniyaddi xukuumaddu dejisay. Waxaa inna sugaya in aan hubinno in hay'ad kasta ee dawladdu ay miisaaniyadda ugu dhaqmaan sida ay tahay.

5. Barnaamij Sharci Dejin

Sharci-dejintu waa xilka ugu mudan ee goluhu u qoolanyahay. Qaybta fulinta kulammo ayaan shir-guddonku kala yeeshay, si loo ogaado jadwalka sharci-dejinta xukuumadda u degsan. Wada-hadallada la xariira sharci dejintu way socondoona, natiijada ka soo baxdana waxaa shirguddoonku golaha uga warbindoona marka uu furmo kal-fadhiga bilaabandoono bisha Maarso, 2013. Qaybta Fulinta waxaan, inta lagu jiro hakinta kal-fadhiyada golaha, ka filaynaa in xafiiska guddonka golaha u soo gudbiyaan jadwalka sharci dejinta iyo dhismaha hay'adaha ee u qorshaysan dastuurkuna farayo.

6. Dib-u-Eegista Dastuurka

Guddigi Golaha ee **La-socodka Dib-u-Eegista Dastuurku** waa inno dhisanyahay Waxaa gacanta lagu hayaa dejinta qorshaha dib-u-eegista dastuurka kaaso fulintiisa uu goluhu bilaabidoono kal-fadhiga soo socda. Barnaamijka dib-u-eegista Dastuurku wuxuu soo af-jarmidoonaa dhammadka sannadka 2014 (Haddii alla yiraahdo), sida aad ku arki doontaan qorshahaas. Sida dastuurku inna farayo ayaynu u ambaqaadidoonnaa dib-u-eegista dastuurka. Waxaan, si xushmad leh xlidhibaannada u farayaa, in marka la tashaneysaan dadka degaannada aad matishaan aydin ka tegin soo ururinta dareenka dadweynaha Soomaaliya ee ku saabsan dastuurka. Naqshadaynta qorshaha dib-u-eegidda dastuurka waxay fuli doontaa inta lagu jiro muddada hakinta kal-fadhiyada.

Waxaa xusid mudan in aan hortiinna ka caddeyo in dib-u-eegista dastuurku ay noqondoonto mid ay wada qaataan qayb-baha, goboleeda iyo degaannada Jamhuuriyadda Soomaaliya. Si gaar ah waxaan ugu baqayaa Soomaliland waxaanna si walaalnimo ah ugu baaqayaa in ay kaalinta kaga aaddan ka qaataan sidi dadkeennu u hanan lahaa aay wacan.

7. Xafiisyada La Tashiga Dawdweynaha

Xildhibaannada waxa waajib ku ah in ay la tashadaan dadweynaha degaannada ay matilaan. Golaha Shacabka waxuu xalaal noqonayaa marka xil-dhibaan walbi uu xafiis ku yeesho degaanka uu matilo. Xilkaas asaga ah si tartiib tartiib ah ayaan u fulin doonaa waxaanna ku bilaabidoonnaa xafiisyo hour-dhac oo aan ka furidoonno meelo dalka ka mid ah.

Muddada hakinta ka fadhiyada waxaa la gudboon xildhibaan kasta, inuu ku noqdo degaanka uu matilo si uu:

- Uga warbixiyo hawlaha aan qabannay;
- Uga bogto wel-welka ay dadweynuhu qabaan iyo arrimaha mudnaanta u leh;
- Golaha u soo gaarsiiyo warbxin buxda oo ku saabsan xaaladda dhabta ee ka jirta degaanka. Waxaan xildhibaan kasta si xushmad leh uga codsanayaa inuu keeno warbixin qoraal ah oo ku saabsan xaaladda dhabta ah ee degaanka ka jirta, si loo gelyo bogga interneetka ee Golaha;
- Goluhu u helo farriimo ka yimaada degaannada oo ku saabsan waxa dadkeenno inna farayo in aan falno;
- Si goluhu u fahmo dareenka dadka ee la xariira nabadaynta iyo midnimada qaran;
- Si aan dadkeenna u hoggaminno;
- Goluhu u noqdo mid u qalma matilaadda shacabka

Waa in aynaan marna hilmaamin in nahay: **AFHAYEENNADI SHACABKA!**

Intaas aan sheegay ka sokow waxaynu xaq u leennahay in aan nasanno. Meesha aan marayno waxaan ku soo gaarnay mintidnimo iyo hawl adag oo qof kasta oo idinka mid ahi uu qabtay. Waxaynu mudannahay in aynu isku bogaadinno gessinnimada, ididiilada yo mintidnimada aan muujinnay. **Allaha idinka abaal mariyo**!

8. La kulmidda iyo Wargelinta dadweynaha

La kulmidda iyo wargelinta dadweynuhu waxay dadka u kordhinaysa wacyi waxay siinaysaa awood ay kaga qayb-qaadanayaan geeddisocdka dimuqaraaddiyaynta dalka. La kulmidda iyo wargelinta dadweynuhu waxay baarlammanka ka dhigaysaa mid daah-furan. Barnaamijkaas asaga ahi wuxuu baarlammaanka iyo dadweynaha ka dhex-samaynayaa xiriir adag, isla markaasna wuxuu dadweynaha fursad u siinayaa inay si wax ku ool ah uga qayb-qaataan dib-u-eegista dastuurka.

9. Bulshada Rayadka ah

Waxaa lagama maarmaan ah in Golaha iyo bulshada rayiad ahi ay yeeshaan xiriir sokeeye si bulshada rayidka ah ay ula socoto sharci dejinta, talana ugu yeelato.

10. Nabadayn iyo Midnima Qaran

Golohu kaalin udub-dhexaad ah ayuu ku leeyahay nabadaynta iyo midnimada qaran. Xilkaas asaga xildhibaannadu waa ay bilaabeen waase in aan isku dhiirri gelinno in la dardar geliyo. Muddada hakinta kalfadhiyada xildhibaan walbi waa uu tegi doono degaanki uu matilayay.

11. Hoggaaminta Golaha

Xafiiska Afhayeenku wuxuu u qoolanyahay in Golaha shacabku noqdo tiir adag oo dawladnimo. Durba tallabooyin lagu baritaarayo kartida hawlfulinta xafiiska ayaa la qaaday, sida hawlgeinta la taliye dhinaca sharciga (legal advisor).

12. Horumarinta Kaabayaasha Shaqada

Xarunta Golaha shacabku waxay u baahantahay dayactir iyo horumarin si ay xildhibaannadu u helaan jawi ay ku gudan-karaan xilka culus ee ay shacabka u

hayaan. Shir-Guddoonka Golaha iyo dawladda Turkiya, oo muujisay in ay u heellaantahay in gacan ka geysato, waxaa u socda wada hadallo. Waa in aan hubinno in ay guddiyada goluhu helaan wax kasta oo lagama maarmaan ah sida agab shaqo, amni iyo hawlwadeenno.

13. Samaynta qayb cilmi-baaris iyo Maktabad Goluhu Leeyahay.

Qaybta cilmi barista iyo maktabaddu waxaa goluhu ka faa'iidayaa aqoon iyo raad-raac taariikheed. Waxay kaloo si weyn u bari-taaraeysaa hawsha guddiyada waxayna ka helayaan cilmi-baaris taya leh iyo xog ku saabsan sharciyada. Waxaa hadda socda hawshi lagu samaynayo goobti shaqada ee qaybtaas, waxaana la hawlgelindoona hawl-wadeenno loo tababaridono qaybtaas ayada ah. Waxaan rajayna in marka laga soo noqdo hakinta kal-fadhiyada ay jiri doonaan agabki lagama maarmaanka u ahaa hawlgelinta qaybtaas.

14. Hay-kalka Maamul, shaqaalaynta iyo kor-u- qaadidda xirfadda Hawlawadeennada Golaha

Xilgudashada golaha waxaa kaabi kara hawlwadeenno karti iyo aqoon u leh hawlaha golaha, iyo haykal maamul oo la saanqaadi kara baahida xil-guasho ee marba marka ka dambaysa si kordhaysa. Sooddonka (30) hawlawdeen ee hadda shaqeeya ka sokow, waxaa la qaadan doonaa affartan (40) cusub oo la tababarta hawalwdeennada hadda shaqeeya, si marka laga soo noqdo hakadka kalfadhiya ay guddiyadu hawlahooda sidi loogu talagalay ay u gutaan.

15. Samaynta Qaybta Macluumaadka (ICT)

Waxaa lagu hawlanyahay samaynta **Bog -Interneta** (Website) oo Goluhu leeyahay inta lagu jiro hakadka kal-fadhiyada. Fadlan la socda boggaas, waayo waxaa kala socondoontaa warar idinka aad idiin khuseeya.

16. Kor-u-Qaadidda ammanka Golaha iyo Xildhibaannada

Amni la'aan goluhu xilkiisa ma gudan karo. Waxaa hadda lagu hawlanyahay in la helo agabki lagama maarmaanka u ah sugidda ammaanka iyo hawlwadeenno amni.

Waxaan filayaa inaad ila qiri doontaa in aan mudda yar wax badan ku qabannay. Haddana innaga oo isku bogaadinayna wixi qabannay, waxaynu isla garawsanaynaa hawlaha inna sugaya aanay fari ka qodnayn.

Su'aasha aan mar walba ay thay in aan ku hakanno waxa weeye **: maxaynu ka tarnay in ay dadkeennu helaan nolol fiican?**

Jawaabta su'aashaasi waxay noqonaysaa in aynu tub dheer goyno si ay ay innoku bannaanaato in oran karno: **Haa, waxbaan dadkayaga u tarnay**.

Sannadka innaku soo fool leh wuxuu noqon doonaa sannadka ugu muhimsanaandoona taariikhdeenna. Samaynta dastuur iyo Gole Shacab oo rasmi ah, labaatan (20) sano oo qalalaase lagu jiray ka dib, waxay dadkeenna siinaysa xaqa ah inay fishaan mustaqbal wanaagsan. **Shacabka Soomaaliya waa innaka dhur-sugayaa, wax weynna waa innaka filayaan. Ma gabi karno; mana gabi doonno, Ilaah Idinki.**

- Sannad Keliya dib uguma dhisi karno Soomaaliya.
- Sannad keliya kagama kaban karno burburka xanuunka leh ee dalkeenna iyo dadkeenna la soo gudboonaaday muddo labaaatan sano ah;
- Dimuqaraaddiyadda sannad kuma hirgelin karno;

Lakin waa aynu bilaabi karnaa, waana in aynu bilawnaa soo kabashada iyo horumarka dalkeenna.

Waxaan jeclahay in hadlakayga ku soo gabageeyo in aan idiin soo jeediyo amman aad mutaysateen. Waxaad u dhabar adaygteen dhibaatooyin badan, waxaad muujiseen mintidnimo. Waxaan hortiinna ka qiraya in aan la shaqayntiinna ku farxsanahay. Tub adag ayaa inna sugaysa, waxaana aynu u heellannahay. ***Alalha innala garab-galo dadaalka aan ugu jirno in dadkeennu oo dhammi hanto nolol iyo naallo***.

Waxaad ballanqaadayaa in aan midiidin u ahaado in aad ila xisaabtantaan Gole ahaan, Guddiyo ahaan iyo xubin ahaanba. In badan oo idinka ka mid waan is-qaabbillay, inta aan fursado u helinna waan ka raalligelinayaa. Laga bilaabo ka-fadhiga soo socda waxaan qaabilaadda xil-dhibaannada u qoondayndoonaa toddonaadkiiba laba maalmood (**Axadda iyo Arbacada**). Jadwalka ballannadu wuxuu noqon mid idiin wada furan si fiicanna loo habeeyay.

Sannada badan oo aan ku jirnay colaado iyo xasarado, waxaa lagama maarmaan ah in amba qaadno sidi aan uga bogsan lahayn dhawacyada bulsho ee xanuunka badan. Sidaas awgeed sannadka 2013 waxaan ugu yeerayaa:

SANNADKI AMBAQAADIDDA GEEDDISOCDKA KA BOGSASHADA UTUMIHI COLADDA

WA BILLAHI TOWFIIQ

QEYBTA 2AAD: SOO-KOOBID WARBIXINTA HAWLAHA GOLAHA GUUD AHAAN

Munaasabadaha ugu muhiimsanaa

20kii Agoosto 2012	Dhaarinta Xubnaha Golaha Shacabka	
21kii Agoosto 2012	Magacaabidda Guddiga Doorashada Guddoonka Baarlamaanka	
28kii Agoosto 2012	Doorashada Guddoonka Golaha Shacabka	
Guddoomiye	M.ne Muxammad Sheikh Cusmaan Jawaari	**119 Cod**
Gud. Ku-xigeenka 1aad	M.ne Jeylaani Nur ikar	**91 Cod**
Gud. Ku-xigeenka 2aad	M.ne Mahad Cabdalla Cawad	**112 Cod**
30kii Agoosto 2012	Dhisidda Guddiga Doorashada Madaxweynaha JFS	
2dii Seteembar 2012	Xulidda Guddi Talo bixin oo loo xilsaaro Arrimaha Xildhibaanada dhiman	
10kii Seteembar 2012	Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda FS	
	M.ne Xasan Sheikh Maxamuud	**190 Cod**
17kii Oktoobar 2012	Kalsooni siinta R/Wasaaraha Xukuumadda F.S	
	M.ne Cabdi Faarax Shirdoon (Saacid)	**215 Cod**
14kii Oktoobar 2012	Qaybinta Xeer hoosaadka iyo Istaraajiyadda B.F	
15kii Nofeembar 2012	Ansixinta iyo Dhaarinta Golaha Wasiirrada XFS - **219 Cod**	
5tii Janaayo 2013	Doorashada Guddoonka Guddiyada Golaha Shacabka	

QEYBTA 3AAD: HAWLAHA HIRGALAY KALFADHIGA 1-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA 21-ka AGOOSTO – 30-ka DISEEMBAR 2012

Hawlaha sharciyeed ee Goluhu hirgeliyey

1. **2da Sebteembar 2012** Golaha Shacabku wuxuu toosin ku sameeyey Qodobka 138aad ee Dastuurka
2. **2da Nofeembar 2012** Golaha Shacabku wuxuu laalay Qodobbada 67aad iyo 135aad ee Dastuurka Federaalka
3. **3dii Diseembar 2012** Golaha Shacabka Kalfadhigii 1aad wuxuu dajiyey isla markaana ansixiyey Xeer Hoosaadka iyo Qorshaha Istraatiijiyada Golaha.

Warbixanada la horkeenay Barlamaanka lana Aqriyaay

10kii Seteembar 2012	Warbixinta Guddiga Talo bixinta Doorashada MJFS
6dii Oktoobar 2012	Warbixin ay soo jeediyeen Oday-dhaqameedyadii soo xulay Xubnaha Golaha Shacabka
3da Nofeembar 2012	Warbixinta Guddiga Talo soo jeedinta Dib u eegista qodobada Dastuurka kmg ah
18kii Diseembar 2012	Warbixinta Wasiirka Maaliyadda ee la xiriirta soo gudbinta Miisaniyadda 2013
22kii Diseebar 2012	Warbixinta sameynta Guddiyada Golaha Shacabka
30ka Diseembar 2012	Warbixinta Xiritaanka Kalfadhiga 1aad ee Golaha.

Ansixinta Miisaaniyadda

30kii Diseembar 2012	Ansixinta Miisaaniyadda Sanadka 2013	176 Cod

Soo jeedinta (Moshin) la horkeenay Baarlamaanka

18kii Diseembar 2012	Soojeedin (mooshin) in 25 xubood Golaha Wasiirrada Golaha la horkeeno hal mar (waxaa laga noqday 25kii Diseembar 2012)

Qaraarada la horkeenay Golaha laga dooday lana ansixiyey

28kii Agoosto 2012	Qaraarka Doorashada Guddoonka Golaha Shacabka
2da Sebteembar 2012	Qaraarka Toosinta Qodobka 138aad ee Dastuurka
10ka Sebteembar 2012	Qaraarka Doorashada Madaxweynaha JFS
2da Nofeembar 2012	Qaraarka Laalidda Qodobbada 67aad iyo 135aad ee Dastuurka Federaalka

Dhaarin xubnaha cusub ee Barlamaanka

	Xil. Cusmaan Maxamed Cabdullahi
13kii Nofeembar 2012	Xil. Cusmaan Maxamuud Maxamed (Dufle)
2dii Diseembar 2012	Xil. Cabdullaahi Cali Maxamuud
29kii Diseembar 2012	Xil. Cabdilatiif Muuse Nuur
29kii Diseembar 2012	Xil. Yaasiin Cabdi Seed

QEYBTA 4AAD: WUFUUDDA HEER CAALAMI EE SOO BOOQDAY BAARLAMAANKA

12ka Diseembar 2012	Wafdi uu hogaaminayo Guddoomiyaha Baarlamaanka Jabuuti iyo hadaljeedin uu ka jeediyay Golaha Shacabka
14kii Diseembar 2012	Wasiirka arrimaha Dibadda ee Turkey oo hadal ka jeediyay Golaha Shacabka

QEYBTA 5AAD: WUFUUDDA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKU QAABILAY KALFADHIGA 1AAD

1. Wufuud ka socota Deeq bixiyayaasha iyo Hay'adaha Caalamiga
2. La kulanka Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Midawga Yurub Cathrine Ashton
3. La kulanka Xildhibaano ka socda Dalka Finland
4. La kulanka Wasiirka Iskaashiga Caalamiga ah ee Dalka Sweden
5. La kulanka Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Hormarinta (UNDP)
6. La kulanka Hay'adda Inter Peace
7. La kulanka Wafdi ka socday Dalka Norway